

## **Kaalay soo booqo maktabada!**

Qof walba waa lagu soo dhaweyyaa maktabada. Halkaas, waxaad ka aqrin kartaa joornaalada iyo wargeysyada, isticmaal kumbiyuutaro, amaahso buuggaag, ka qeybgal dhacdooyinka iyo isticmaal waqti. Maktabada waa bilaash isticmaalkeeda sababtoo ah waxaa iska leh degmada.

Waad weydiin kartaa shaqaalaha maktabada caawin iyo warbixin.

Maktabada sidoo kale waxay leedahay intarneet bilaash ah. Tani waxay la micna tahay in aad ka geli kartid intarneetka mobeelkaaga ama kumbiyuutarka ee gudaha maktabada.

Maktabada waxay leedahay websayd. Halkaas, waxaad ka heli kartaa warbixinta ku saabsan dhacdooyinka iyo raadinta buuggaagta, muusiga iyo alaabaha kale ee la amaahsado. Weydii shaqaalaha maktabada ciwaanka websaydka.

## **Kaarka maktabada wuxuu ku aamihanayaa sheeyada guriga la keensado**

Waxaad amaahsan kartaa buggaagta, joornaalada, wargeysyada, muusiga, koorsooyinka luuqada, buuggaagta carruurta iyo filimaanta maktabada. Waxaad u baahantahay kaarka maktabada ee lagu amaahsado alaabaha.

Si aad u heshid kaarka maktabada, waxaad u baahantahay in aad tustid warqada aqoonsiga iyo siisiid ciwaankaaga Finland. Waxaad sidoo kale u baahantahay in aad saxiixdid balan lagu raacayo sharciyada. Sharciyada wuxuu sheegayaa inta dheer ee aad haysan kartid alaabaha la amaahsaday. Haddii aadan soo celin waqtigooda alaabaha aad amaahsatay, waa in aad bixisaa ganaax. Waad weydiin kartaa shaqaalaha maktabada wixii warbiixn dheeraad ah. Kaarka maktabada waa gaar; ha u ogolaanin in uu qof kale isticmaalo kaarkaaga. Haddii uu kaa lumo kaarkaaga, ogeysii shaqaalaha maktabada isla markaas si aad uga hortagtid si xun u isticmaalka.

## **Buugaagta luuqadaada**

Haddii maktabada kuugu dhow aanan haynin buugaagta luuqadaada, shaqaalaha ayaa uga dalbi karo meel kale. Weydii shaqaalaha, iyo waxay kuu helayaan buuggaagta aad rabtiid.

Weydii shaqaalaha maktabada adeegyada ay bixiyaan. Waxay kuugu caawin karaan in aad heshid fasalo luuqad iyo riwaayadaha, tusaale.

Waxaad heli kartaa warbixin ku saabsan adeegyada maktabada iyo bulshada Finnish ee luuqado badan ee [www.infopankki.fi](http://www.infopankki.fi).